



## **Covid- 19, Warbixin Isbuuca 47**

Maalmihii u danbeeyay waxaa jiray koror xoogan oo xanuunka covid-19 uu sameeyay sidoo kale waxaa jirro xayiraadyo badan oo la xoojiyay gobolkan Dalarna.

Waa muhiim in dhamaanteen aan arinkaan si wada jir oga shaqeeyno oon raacno talooyinka haydaha caafimaad ka sidoo kale talooyin soo jeedinta ku saabsan iskoolaad ka iyo xanaanooyinkaba ee degmaddan Ludvika.

## **Soo kaxeeynta iyo keenista Caruurta**

Ardeeyda iskoolaadja iyo goobaha caruurta tagaan waqtiga iskool ka ka bacdi (Fritids) Waa in la keenaa lagana soo wadaa banaanka .

Waalidiinta caruurta keeneysa ineey goobaha waxbarashada gudaha u galaan looma ogola hadeeyan aheeyn arin lagama maarmaan ah.

Keenista iyo wadista caruurta sidoo kale waxaa muhiim ah in waalidiinta gudaha galin oo caruurta banaan ka la keeno banaankana laga waddo. Dhinaca kale xitaa waa muhiim in la ilaaliyo tiradda waalidiinta goobta keenista iyo wadista caruurta ku kulmeeyso. Lämning

Sidoo kale goobaha waxbarashada waxeey codsanayaan in dadka keenaya wadayana caruurta isku mid noqdaan si loo raaco talo soo jeedintii hayadda caafimaadka ee la xiriirtay in aan sameeynin xiriiryo cusub.

## **Caruurta xanuunsata waqtiyadda iskoolaadka**

Caruurta ama ardayda marka xanuunsadaan waxaa isla markaas waalidiinta lasoo xiriirayo macalimiinta iskoolka. Qiimeeynta macalimiinta sameeynayaan ma,ahan mid caafimaadeed laakinse macalimiinta iskoolaadka iyo xanaanooyin ka waxeey waalidiinta lasoo xiriirayaan marka arkaan wax calaamadaha oo tusaya in ardeeyga uusan ka qeeyb qaadan karin waxbarashada.

Si eeysan u dhicin in ardeeyga uu sii joogo goobta waxbarashada waxaa muhiim ah in waalidka laga hayo macluumaad sax. Maamulka iskoolaadka degmadda

Ludvika waxuu waalidiinta ka codsanayaa ineey booqdaan barta Tieto cusbooneysiyaana xiriiryada laga hayo hadii ee wax iska badaleen. Sidoo kale halkan waxaad ku qori kartaa jadwalka ardeeyga iyo waqtiyadda uu imaado.

## **Qaboowga fasaxyada ka danbeeyo**

Dhamaadka sanad dugsiyeedkan waxaa macquul ah in waxbarashada xanaanada iyo goobaha firaqada (fritidshem) in laisku darro loona raro goobo kale.

Xaalka Covid-19 yahay waxaa macquula in wax is badalaan. Si maamulka iskoolaadka u sameeyaan waxwalbo oo wanaaga caruurta, ardeeyda iskoolaadka iyo macalimiinta waxaa muhiim ah hadii aad u baahantihiin goobaha firaqada oo kale mudada u dhaxeeyso 21/12-2020 - 8/1-2021 inaad hadda sii sameeyaan dalabyadiina idinkoo booqanayo aalada Tieto-Edu.

## **Wax calaamado ama Astaamo ah (Symtom)**

Hadii caruurta ama ardeeyda lagu arko calaamadaha xanuunka ka badan afar iyo labaatan saac oo aan wax tijaabo ah laga qaadin waxeey u baahanayaan ineey guriga joogaan ugu yaraan todobo cisho.

Kusoo noqoshada iskoolka ama goob kale oo shaqo waxeey suura galeeysaa qofka markuu soo wargaliyo inuu caafimad dareemayo oo uu sugay ugu yaraan todobo cisho laga soo bilaabo maalinkii uu calaamadaha isku arkay. Labadda maalmood ee u danbeeyso todobadaas cisho waa in ardeeyga ahaadaa qandho la'aan dareemayana caafimaad buuxo.

Waxii aan astaamaha xanuunka la xiriirin laakiinse ka badan maalin lana garan kareeyn ardeeyga waxuu u baahanyahay inuu guriga joogo ugu yaraan labbo cisho oo uu san laheeyn wax astaamo ah inta uusan iskool ama shaqada qofka uusan kusoo laaban. Tani waxeey xaqiijin u tahay in astaamaha qofka isku arkay ahaayeen kuwo kumeel gaar ah.

Tani waxeey sidoo kale quseeysaa hadii qofka ama ardeeyga iskoolka dhiganaya ku haraan wax calaamado ah oo fudud sida inuu marara qaar qufaco, duuf ama dhadhanka oo ka tago qofka. Tani waxeey saldhig u tahay qiimeeynta ah in shaqsiga uusan faafin karin xanuunka Covid-19 kadib todobo cisho oo uu guriga joogay ama la jogay qof qoyska kamid ah oo xanuunka qaba.

Caruur caafimaad qabto laakiinse guriga kuna nool dad waaweeyn oo xanuunka qaba weey aadi karayaan xanaanooyinka, dugsiyadda hoose, goobaha firaqada iskoolka ama dugsiga sare ee qaas ka ah. Waxii intaa kasoo harro waxaa looga baahanyahay in ee sharciyadda hayadda caafimaad ka raacaan.

Waalidiinta caruurta hadeey xanuunsanyihiin waxeey kaliya ilmaha iskoolka iyo xanaanada keeni karaan haduusan jirin qof kale oo qoyska ka tirsan oo aan xanuunsaneen keeni karana caruurta. Tani waa in loo firsadaa si aan si sahlan xanuunka loogu faafin.

Waxii faafaahin dheeri ah ka aqriso adigoo booqanaya barta gobolkan Dalarna ama hayadda caafimaad ka ee Folkhälsomyndigheten

- [Region Dalarna](#)
- [Folkhälsomyndighetens sida: Beslut om skärpta allmänna råd i Dalarnas-, Gotlands-, Värmlands och Västmanlands län](#)
- [Folkhälsomyndighetens sida: Om du eller någon i familjen har blivit sjuk](#)

Ulrika Norberg Eriksson  
Madaxa maamulka xanaanooyinka

Jessica Carlberg  
Madaxa maamulka Iskolaadka